# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1042
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 3:7-14.

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros.

Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros haatan uu wax ka leeyahay wada noolaanshaha ninka iyo naagta is-qaba. Waxaana rasuulku leeyahay, sida ku qoran Warqaddiisii kowaad cutubka 3:1. Waxaana Qorniinku leeyahay sidatan: **"Sidaas oo kalena,**

**dumar yahow, nimankii-nna ka dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin ay erayga la'aantii ku soo hanuunsamaan dabiicadda afooyinkooda."**

**SONG: REEL------CUT------**

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay sida ay tahay in habluhu ay isku qurxiyaan, waxaana ahmiyadda la saarayaa quruxda xagga gudaha laakiin, inkastoo aan la diiddanayn, haddana la adkayn maayo tan xagga dusha ah ee ah dhar-xirashada. Haddaba waxaannu habeenkii inoogu dambaysay ku soo xirnay barnaamijka aayadda 6aad ee isla cutubkan 3aad, markaasoo rasuul Butros lahaa sidatan:

**"Saarahba sidaasoo kalay Ibraahim u addeeci jirtay, oo ay ugu yeedhi jirtay, Sayidow; oo idinna haddii aad wanaaf fashaan oo aydnaan ka cabsan wixii argaggax leh waxaad tihiin carruurteeda."** Saarah oo ahayd haweenay aad iyo aad u qurux badan.

Waxaana caashaqay boqorro badan, oo waxaa Ibraahim ka soo gaartay dhibaato sidii uu iyada ku hanan lahaa. Waxaaba jirtay beri ay Masar u dhaadhaceen, oo boqrkii Fircoon jeclaystay iyada, isaguna wuxuu ku yiri, waxaad boqorka ku tiraahdaa ninkaasu waa walaalkay." Wuxuu ka baqay haddii uu yiraahdo aniga qaba, inay dilaan isaga. Waayo Masriyiintu waxay aad u jeclaan jireen dumarka quruxda badan, oo haddii nin uu qabana ninka ayey dilayaan markaasay iyadana la wareegayaan. Ibraahimse wuxuu xaaskiisii Saarah ku yiri,

**"Raggan reer Masar ha u sheegin inaan ninkaagii**

**ahay, haddii kale way i dilayaan."**

Markii Fircoon damcay inuu la wareego iyadii, Ilaah baa riyo ugu digay, oo waxaa lagu yiri, "Iska eeg inaadan taaban xaaska ninkaas xaqa ah." Mana uu taaban iyadii laakiin Ibraahim buu u soo celiyey, oo xoolo badan ayuu siiyey oo wuxuu u diray dalkoodii.

Balse ka fakar Saarah, oo sidaas looga daba-dhacay, haddana iyadu ma ayan doonayn nin aan ninkeeda ahayn, oo waxay Ibraahim ugu yeeri jirtay inuu yahay duqeeda. Haatan Butros ayaa wuxuu ka hadlayaa sida markaa ragga xaasaska ah ay ula macaamiloonayaan dumarka ay qabaan, waana ragga masiixyiinta ah, wuxuuna leeyahay rasuul Butros sida ku qoran Warqaddiisii kowaad 3:7, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Nimankow, idinkuna sidaas oo kale afooyinkiinna aqoon kula dhaqma sidii iyagoo ah weel tabar daran, oo iyaga maamuua sida kuwa idinla dhaxla nimcada nolosha, si aan baryadiinna loo hor joogsan."**

Marka ay sidan tahay, anigu waxaan rumaysanahay in aayaddan ay isticmaali karaan ragga iyo dumarka masiixyiinta ah. Haddaba ninka waxaa la doonayaa inuu xaaskiia sida qof isaga ka itaal yar oo kale ula dhaqmo, oo waxaa la doonayaa inuu darajeeyo xaaskiisa. Haddaba waxaad mooddaa in wakhtiyadan dambe dumarkii ay heleen xorriyad.

Habase yeeshee dumarku waxay u baahan yihiin in loo turo, waayo hawlaha qaar iyagu ma samayn karaan. Markaa dooni maayaan inay qaataan jagada ninka iyo weliba inay la sinnaadaan. Waxay

doonayaan inay dumar caadi ah iska ahaadaan, laakiin aanay noqnon in naagtu ay la sinnaato ninka. Ilaah naagta uma uusan adkayn sida ninka oo kale.

Maaddaama ay ka liciifsan tahay ama ka tabar daran tahay ninka, waxaa la doonayaa in si xushmad iyo darajo leh loola macaamiloodo. Ragguna waa inay dumarka u hor mariyaan wax waliba. Markii aynu dhaqankeenna dib uga fakarno waxaynu arkaynaa sida hablaha loo liidi jiray, oo waxaabad is-leedahay odayaashii hore niman wax waliba iyaga un isla doonaya ayey ahaayeen.

Markii cunno la soo dhigo waa in iyaga lagu billaabo, oo markii shaah la cabbayana waa n iyaga lagu billaabo. Dumarka waxay cuni jireen wixii ka soo hara ragga, oo waxaad mooddaa inayan lahayn xuquuqdii dadnimo. Habase yeeshee wakhtigu wuu isbeddelay, oo ninna dooni maayo maanta in gabadhiisa ay sugto hambada ninkeeda iyo saaxiibbadiis.

Waxaa haddaba bulshadeenna maanta, khaasatan masiixiyiinta ay u hayaan xushmo iyo darajo hablaha, haddii ay masiixyiin yihiin iyo haddii kaleba. Waxay leeyihiin mudnaanta kowaad, waxaana Ingriisku yiraahdaa: **"Ladies first."** Oo loola jeedo adeegga kowaad waxaa leh hablaha. Haddii bas la soo galo, waa in kuraasta la siiyo marka hore dumarka.

Raggu hadduu doono ha iska taagnaado, ama baska dambe ha soo raaco. Waxaa kaloo loo hor-marinayaa cunnada marka la joogo xafladaha. Marka dariiq yar ay kaaga hor yimaadaanna, iyaga ayaa marka hore

gudbaya, waayo mudnaanta kowaad ayey leeyihiin habluhu. Waana waxa imminka rasuul Butros inagu baraarujinayo, makra uu leeyahay:

**"Nimankow, idinkuna sidaas oo kale afooyinkiinna aqoon kula dhaqma sidii iyagoo ah weel tabar daran, oo iyaga maamuusa sida kuwa idinla dhaxla nimcada nolosha, si aan baryadiinna loo hor-joogan."**

Marka uu leeyahay rasuulku, **"Si aan bryadiinna loo hor-hoogsan"** ayaa taasu u dhacaysaa in haddii ninku uusan xaaskiisa u turin, ay dhici karto in qoysku burburo.Waxaana bilaabanaya inaan la wada tukan, oo xiriirkii qoysku baaba'o.

Haddii aad noqotaan qoys shiddo iyo wareer badan, waxaa dhacaysa in aanu Ilaah idin maqal, ama uusan xusuusan baryadiinna. Waxba ka duwanaan maysaan mukulaalo iyo eeyo dagaallamaya, haddii mar waliba aad diriraysaan. Waa in la kala roonaado, oo si qabow loo wada noolaado. Haddii aasaasku yahay Masiixa waxba idinka hallaabi maayaan, waayo qof kasta aasaas adag buu ku taagan yahay.

Naagtu waxay noqonaysaa mid ku derajo iyo heer ah Saarah oo ahayd afadii Ibraahim, oo waxay xushmad iyo derajo iyo jacayl aan dhammaanayn u haysaa duqeeda. Ninkuna wuxuu garanayaa inaanu naag kale weigii u tegi doonin, naagtiisa mooyaane. Waayo Ilaah baa diiday in ninku naag kale lahaado. Waxaana mar waliba maankiisa iyo maskaxdiisa ku soo dhacaya eraygii Ilaah yiri, ee ahaa:

**"Wixii Ilaah isku xiray, Ninna yaanu kala furin."**

Ninka Masiixiga ah wuxuu weligii la joogayaa afadiisa, oo afadana nin kale uma tegi karto

weligeedna waxay la joogaysaa ninkeeda. Haddiise qof waliba indhaha xirto, oo uu billaabo inuu kan kale la dagaallamo, miyey dhacaysaa in Ilaah maqlo ducada qoyskaas kala tegaya? Maya, oo rasuul Butros wuxuuleeyahay, **"Si aan baryadiinna loo hor-joogsan, waa in nin waliba naagtiisa Maamuuso, naagtuna ay ninkeeda maamuusto."**

Haddaba intaanan ka bixin qaybtan khusaysa guurka ayaan jeclaan lahaa inaan aniguna hal ama laba eray ku darsado. Guurku waa sheey Ilaah siiyey dadka, mana ahan wax masiixiyiinta keliya ay leeyihiin, amase reer binu Israa'iil. Waxaa kitaabka Bilowgii laynoogu soo sheegay in Ilaah abuuray ninka, oo uu wakhti ahaa cidlo. Waxaanan filayaa in Ilaah wakhti dheer Aadan kelidii ku hayey Beer Ceeden, oo Aadanna uu dareemay cidlanimo. Wuxuuna kaloo Aadan gartay inay jiraan sheey uu tabayo oo ka maqan. Dabadeedna waxaa qorniinku leeyahay, "Ilaahna wuxuu ninkii buu hurdo weyn ku riday, oo wuxuu feer-calaaniisii ka abuuray ama ka sameeyey Xaawo. Waxaana Qorniinka Qoduuska ahi leeyahay sida ku qoran kitaabka Bilowgii 2:23, sidatan soo socota:

**"Ninkiina wuxuu yidhi, Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag, maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin."** Iyadana waxaa Ilaah ugu yeeray Caawiso ama kalkaaliso sida ku qoran kitabka Bilowgii 2:18, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu yidhi, Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado; waxaan u samayn doonaa**

**mid caawisa oo ku habboon."** Haddaba naagtu waxay ahayd wixii Aadan tabayey, oo cidlanimadiisiina way soo dhammaatay, waxaase ay noqotay qayb isaga ka mid ah, isla sida heesaagii Soomaaliyeedba ku heesay markuu lahaa: **"Bar Wadnaha ku taalloo, igu baaqday weeyaan."**

Haddaba qofka dumarka ahi waa kalkaalisada ninkeeda, markaana maahan in iyaga loola macaamiloodo sida inay yihiin carruurteenna oo kale. Iyagu waa qayb ka mid ah jidhkeenna. Waana in isagu jeclaado xaaskiisa, iyana ay jeclaato ninkeeda. Isaguna waa inuu daafaco xaaskiisa, taasaana noqonaysa xiriirka dhabta ah ee guurka.

Haddaan labadii eray ee aan doonayey inaan idiin sheego intaas kaga baxno, ayaannu haaan isla eegaynaa maaddada soo socota ee ah:

## SIDA KINIISADDU AY IYANA ULA DHAQMAYSO XUBNAHEEDA.

Waxaannu bal haatan la soo kala baxaynaa isla cutubkii 3aad ee Warqaddan kowaad ee rasuul Butros, waxaanan isla eegaynaa aayadda 8aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Ugu dambaysta, waxaan idinku leeyahay, Kulligiin isku maan ahaada, oo isu jixinjixa, oo sida walaalo isu jeclaada, oo isu naxriista, oo is-hoosaysiiya."**

Waxaa lala hadlayaa qoomiyadda masiixiyiinta ah ee isku meel wax ku wada caabuda. Waxaana la doonayaa inay isku maan ahaadaan, oo isku naxaan, oo isku naxariistaan, oo is-kaalmeeyaan. Waxaa la doonayaa in midba kan kale isku hoosaysiiyo.

Maahan in lays karho, oo lays nebcaado, oo midba

kan kale addoonsado. Haddaba dabiicadahaas aayadda siddeedaad ayaa waxay ficil ka dhigayaan dabiicadaha masiixyiintu ay iskula dhaqmayaan. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubak 3:9, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Shar shar ha ka celinina, cayna cay ha ka celinina, laakiinse duco ka celiya, maxaa yeelay, saas aawadeed waxaa laydiinku yeedha inaad barako dhaxashaan."**

Weli aayaddu ma dhammaystirna laakiin tan xigta ayaannu idiinku dhammayst-iraynaa haddii kale micnaha la soo bixi maysaan. Wuxuu haddaba leeyahay rasuul Butros:

**"Haddii nin ka mid ah wehelnimada hadal been ah idinka faafiyo, waa waxyaabo aan run ahayne, ma inaad adiguna waxyaabo been ah ka faafiso baa? Mise waa inaad ka aarsato?"**

Maahan inaad sidaas yeesho laakiin Ilaah baad hor dhigaysaa---Ilaah baa isaga ka abaal marinaya wixii uu kuugu sameeyey. Taasina waxay yaraynaysaa buuqii iman lahaa iyo dooddii iyo is-xagxagashadii dhex iman lahayd wehelnimada.

Bal waxaad xusuusataa inaynu innagu u taagan nahay Masiixa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadaynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Buros 3:10, waxaana qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Kii doonaya inuu nolol jeclaado, Oo arko maalmo wanaagsan, Carrabkiisa shar ha ka joojiyo, Bushimihiisana yaanay khiyaano ku hadlin."**

Marka ay sidan tahay innaga oo dhan waxaannu doonaynaa inaynu noolaanno, laakiin nasiib-darro

waxaa imminka jira rumaystayaal badan oo aan ku naaloonaynin rumaysadkooda. Welibana ma haystaan farxadda Masiixa, welibana kama gudbaan caqabadaha soo foodsaara qofka Masiixiga ah.

Haddaba nin ka mid ah xerta ayaa maalin ii yimid, wuxuuna igu yiri, **"Walaal waxaan doonayaa in noloshaydu ay noqoto mid loo bixiyo Masiixa si Masiixu ii jeclaado."** Haddaba mid baa jirta laga doonayo in qofka noloshiisa siinaya Masiixa oo doonaya inuu dadka tusaale u noqdo laga doonayo inuu sameeyo, waxaana weeye sidii rasuul Butrosba yiri: **"Kii doonaya inuu nolol jeclaado, Oo arko maalmo wanaagsan, Carrabkiisa shar ha ka joojiyo, Bushimihiisana yaanay khiyaano ku hadlin."** Weli waxaannu ku jinaa dhegaystayaal Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:11, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo ha ka leexdo shar, oo wanaag ha sameeyo; Nabad ha doondoono oo ha raacdaysto."** Haddaba qofka Ilaah maahan inuu inta meel iska fariisto yiraahdo waxaan ahay qoduus, waxaa laga doonayaa inuu ficil ka dhigo baadi-goobka waxyaabaha isaga ka dhigi kara qoduus. Waxaana ugu horreeya qoduusnimada, in marka hore laga leexdo sharka. Waxaa nolol qoduusnimo lagu helayaa in xanta iyo diradiraha layska joojiyo.

Waa in ugu horrayntaba qofku sharka ka soo leexdo, oo uu nabadda qiimeeyo. Bal aynu maanta Ilaah u noolaanno, miyaanay taasi ahmiyad weyn lahayn. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska warqadda kowaad ee rasuul Butros 3:12 ayaa waxaa Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay fiiriyaan kuwa xaqa ah, Dhegihiisuna waxay u furan yihiin baryadooda; Laakiin wejiga Rabbigu waa ka gees kuwa sharka sameeya."**
Marka ay halkan joogto ayaannu arkaynaa in qorniinka cajaa'ibyadiisu ay badan yihiin. Butros wuxuu halkan ku soo xiganayaa Sabuurka 34:16-17. Waxaana qorniinku leeyahay, haddaan dib ugu noqonno kitaabka Sabuurradda, sidatan:
**"Rabbiga indhiisu waxay fiiriyaan kuwa xaqa ah, Oo dhegiiisuna waxay u furan yihiin baryadooda. Wejiga Rabbigu waa ka gees kuwa sharka sameeya, Inuu iyaga xusuustooda dhulka ka baab'iyo."**
Haddaba taasu waa warbixin kulul sida ku qoran Sabuurkan. Waa sheey Hadallada Ilaah ay adkaynayaa wax badan. Ilaah wuxuu caddaynayaa inuu maqlayo baryootanka kuwiisu ay isaga baryayaan.
Habase yeeshee isagu ma uusan ogolaan inuu maqlo baryada kuwa aan Isaga ka cabsanin oo aan kuwiisana ahayn. Salaadda keliya ee qoka dembiilaha ah laga doonayo inuu marka ugu horraysa Ilaah la hor yimaado, waxa weeye inuu ku yiraahdo Ilaah, **"Ilaahow, waxan aqbalayaa in Masiixu yahay Badbaadiyahayga. Waxaan markaa kaa baryayaa inaad i aqbasho anigoo dembi leh, balse Masiixa ku dhex jira."**
Baryadaas oo kale waa kuwa Ilaah maqlayo oo welibana uu ka soo jawaabayo. Waa in Ilaah lala hor yimaado baryo ama ducooyin caqli gal ah, mase ahan in waxaan soconayn lala hor yimaado. Haddii aad tiraahdo qof dhintaya yaan Ilaah u baryayaa sidii uu ku soo noolaan lahaa, inkastoo uu Ilaah

karo iuu dhimashada qofka ka soo sara-kiciyo. Ilaah wakhti buu u dhigtay ee ay tahay inuu dhimashada ka soo sarakiciyo dadkiisa.
Balse maahan in haddii qofi dhinto Ilaah la weyddiisto in qofkaas uu dhimashada ka soo sarakiciyo. Ilaah taas oggolaan maayo, oo ficil ama go'aan uu horey u gaarayna dib ugu noqon maayo. Waa in waxyaabaha noloshayadu ay u baahan tahay ee doonistiisa waafaqsan la weyddiisto.
Waayo Ilaah wuxuu ballan qaaday inuu maqlayo baryootanka dadka uu uumay oo dhan. Haddii aad ka mid tahay muuminiinta Msiixyiinta ah iyo haddii kaleba waxaad tahay dadkiis, wuuna ku maqlayaa mar waliba ee aad si daacadnimo ah Ilaah ula hadasho. Waxaa Sulaymaan inoo sheegayaa sida nafsaddu ay dadka u arbusho, wuxuuna leeyahay sida ku qoran 2:17 oo leh:
**"Sidaas daraaddeed nolosha waan nacay, maxaa yeelay, shuqulka qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oodhammu dhib uu ii ahaa, waayo, kulli waa wax aan waxba tarayn iyo dabagalka dabaysha."**
Haddaba imisa rag iyo dumar ah ayaa nolosha nacay, oo aad maalin waliba ka maqashaa afkooda, iyagoo leh:
**"Waan is-karaahiyeystay ama waan is-nacay."** Kuwaasi maahan weliba dabaqadaha bulshada ugu saboolsan ee waa kuwa lacagta leh ama beelaha ladan ka yimid. Waxay arkayaan in noloshu ay ahayd mid maalin waliba isla wixii shalay aad samaysay aad ku soo noqonayso, noloshuna macno ma leh. Kuwo badan ayaa tareemada isku dhiga. Kuwana waxay ka soo boodaan dabaqyo dhaadheer, qaarna xabbad ayey

isku dhuftaan. Kuwo daroogo ayey isku shubaan, kuwana qaadka ama khamriga cusub ayey indhaha ku kala qaadaan subax waliba. Haddii la waayo freshka, baarixigu waa lama huraan. Haddii labadaba lawaayo, isagana waa la waayey. Wuxuu la mid noqonayaa ninkii reer koofurka ahaa ee yiri,

**"Haddii Masaggo la waayey, anna waa la'i waayey."**

Haddaba miyaa kuwa Ilaah jecel ay ka duwan yihiin kuwa is-dilaya, ama khamriga iyo qaadka nolosha ku baritaara?

Mise waxay ku jiraan nolol aan la mid ahayn tan kuwa dhibaataysan haysata? Marka ay sidaas tahay, bal aynu la soo kala baxno Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 3:13, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan soo socota:

**"Haddii aad waxa wanaagsan ku dadaashaan, bal yaa wax idin yeeli doona?"**

Muxuu haddaba taas ula jeedaa miyaa Ilaah innaga ina siiyey gaashaan aynu cid walia isaga daafacno, oo aan kaga gaashaamanno dhibaatooyinka? Bal aynu horey idiinku sii wadno meeriska oo isla eegno aayadda 14aad ee cutubka 3aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiinse xaqnimada daraaddeed haddii aad u xanuunsataan, waad barakadaysan tihiin. Haddaba ha ka cabsanina cabsigelintooda, hana welwelina."**

Haddaba silica kuwa xaqa ah waa inay ku helaan farxad. Markaa gaashaan gaar inoo ah oo aan ka ahayn hadallada Ilaah ee qoran ma jiraan. Dhibaatadu isku si ayey inoogu wada imanaysaa innaga iyo kuwa aan weli Masiixa rumaysan. Ha yeeshee innagu dhibaatada waxaan ka qaadanaynaa

khibrad oo waannu u adkaysanaynaa, waayo waxaannu garanaynaa inaan xaqnimada daraaddeed u xanuunsanayno ama u silcayno. Maahan in la adkaysto oo keliya, laakiin waa in dhibka lagu farxo. waa wax yaab leh haddaba markii masiixyiintu ay ku farxaan silica iy dhibka haysta, marka kuwa aan Masiixa garanaynin ay isku dilaan. Waxaa kala duwanaanshaha keenaya waa Masiixa. Waayo Ruuxa qoduuska ah ayaa wuxuu nafsaddeenna hubaal uga dhigayaa waxyaalaha Masiixa.

Kuwa aan Masiixa garanaynin mahaystaan hubaasha waxyaabaha Masiixa ama injiillada. Ha yeeshee kuwa aan Masiixa raacsanayn waxay bilaabayaan in marka hdibaatadu ay ku badato, inay la noqoto inay ahlu naar yihiin. Waxaanay is oranayaan maaddaama aan dunida ku rafaadayo aakhirana rafaad kale iiga dambeeyo maxaan u noolaanayaa, waaban is-dilayaa. Saacaddaas iyada ah ayaa waxay qofka caadiga ah ee aan Ilaah aqoon u tahay, saacaddii badbaadada. Waa marka ay ahay inay Ilaah isku dhiibaan, oo ugu kalsoonaadaan dhibaatadooda.

**SONG: REEL----CUT-----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box

21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin